



# Dib-U-Cusbooneysiinta Roosevelt

## Wararkii u Dambeeyey Dhismaha: Dayrta 2015



Muuqalka Irida Jimka Roosevelt ee dib loo casriyeeyey laga soo geli doono, Furitaanka Deyrta 2016

**Wajiga 1aad ee Dhismaha**  
XAGGAAGA 2015 –XAGGAAGA 2016

- Qolka Jimicsiga, dhismaha muusikada iyo burburinta qolka qalabka kuleylka
- Dhismayaal ku meel gaar ah
- Dhida qol jimicsi oo cusub iyo fasalka, hool cusub iyo makhaayada ardeyda
- Hoolkii hore oo loo bedelayo xarun warbaahineed cusub

### Isbedelada Lagu Sameeyey Dhismaha

Shaqo mug leh ayaa laga qabtay Dugsiga Sare ee Roosevelt oo dib loogu casriyeynayey taasi oo ay ku baxayso lacag dhan \$92 milyuun oo doolar. Mashruucu wuxuu ku socdaa waqtigii iyo miisaaniyadadii loogu talagalay iy ad oo dhismayaasha ugu horeeya la furi doono xilliga dayrta ee 2016.


### Wajiga 1aad Dhismuhu Horuu u Socdaa

Dhismaha waxaa loo qabanayaa wajiyo inta uu socdo si loo yareeyo hakad ku yimaada waxbarashada ardeyda iyo raadka uu ku yeelanayo dariska dugsiga. Wajiga koowaad(1aad), waxaa la burburiyey qolkii jimicsiga, qolkii muusikada iyo qolkii kuleyliyaasha dugsiga yaaleen.

Dhowrka bilood ee soo socda dhismuhu wuxuu ka socon doonaa qolka jimicsiga ee cusub, dhinaca fasalada, tiyaartarka cusub iyo makhaayada ardeyda oo cusub. Hoolkii Riwaayadaha hore waxa laga bedelayaa xarun cusub oo warbaahineed.

### Xarumo Ku-Meel-Gaar Ayaa La Diyaariyey

Fasalada cusub ee ku-meel-gaarka ahi waxay ku yaalaan cawska wajahada dugsiga ku yaal. Dhismaha tobanka ka kooban wuxuu martigelin doonaa waaxda xisaabta iyo gargaarka galinta dambe ee waxbarashada Step Up/SUN. Mid ka mid ah dhismayaasha ku meel gaarka ah waxaa loo adeegsan doonaa Xafiisyada Adeegyada Bulshada iyo Armaajada Dharka Dhalinyarada. Kuwa kale ee soo hadhay waxay si ku-meel-gaar ah u noqon doonaa qolka biraha lagu baaciyey. Fasaladii Jimicsiga Jirka waxaa lagu qaban doonaa dhisme teendho kuleyliye leh oo cusub.






## Wajiyada Dhismaha ee Soo Socda:



### Wajiga II Dhismaha

XAGGAAGA 2016 – XAGGAAGA 2017


- Hool cusub, qolka jimicsiga, xarunta warbaahinta iyo makhaayadu waxay furmi dayrta 2016
- Dib u hagaajinta dhismayaashii asalka ah 1921 goobaha la talinta, maamulka iyo barashada
- Dhistaanka qeybta labaad xarunta ardeyda
- Goobaha ku meel gaadhka ahi sidooda ayay ahaan



### Wajiga III Dhammaad

XAGGAA 2017 – DIISEMBAR 2017

- Dhammaan dhismayaasha la cusbooneysiyeey waxay ardeyda u furan yihiin dayrta 2017
- Burburinta makhaayada, maktabadii hore
- Ka qaadista goobihii ku meel gaarka ahaa
- Ka qaadista xayndaabkii dhismaha
- Shaqadii goobta iyo horumarinta muuqaalka dhireyntu waxa ay dhameystirmi xilliga Jiilaalka







## Waa Maxay Macnaha ay u Sameyneyso tani Ardeyda iyo Shaqalaha

Fasalada waxaa loo rari doonaa dhismayaashii hore, fasalo ku meel gaar ah, iyo goobo cusub kolba sida dhismahooda loo dhiso. Kooxda mashruucu waxay xidhiidh joogta la yeelan doonaan shaqaalaha si looga yareeyo carqaladaha macalimiinta iyo ardeydaba ilaa intii suurtagal ah.

### Tiyaatarka iyo Bandhigida Farshaxanka

Sanad-dugsiyeedka 2015-16, fasaladii riwaayadaha waxaa lagu qaban doono fasalka waxbarashada guud. Waxaa la cayimi doonaa goobaha ay ka dhici doonaan go'aan baa laga gaari doonaa. Xiliga dayrta ee 2016, fasalada riwaayada iyo muusikada waxaa loo rari doonaa dhismaha cusub ee tiyaatarka.

### Ciyaaraha iyo Jimicsiga Jirka (PE)

Sanad-dugsiyeedka 2015-16, fasaladii Jimicsiga(PE) waxaa lagu qaban doonaa dhisme la diiriyey iyo qolka biraha lagu qaado oo ku meel gaar ah. Shaqaalaha ciyaaraha fudud waxay dib u eegis ku sameynayaa goobihii kale ee loo kubada gacanta lagu tababaran karo iyo ciyaaraha sanad-dugsiyeedka 2015-16. Fadlan waxaad la tashi la sameysaa tababarahaaga wixii macluumaad ee ugu dambeeyey. Dhismaha cusub ee Jimicsiga waxaa la furi doonaa iyada oo uu yeelan doona dhammaan wixii qalab jimicsi yeelan lahaa xilliga dayrta 2016.

Garoonkii kubada cagta iyo goobtii lagu ordayey waa ay furnaan doonaan inta dhismuhu dugsiiga ka socdo. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jiri doono waxooga carqalado ah- kuwaas oo ah dhinaca dhismaha xayndaabka lagama soo geli karo N. Burr Avenue. Musqulihii caadiga ee garoonka ku yaalay ma isticmaali kartid, laakiin waxaa jiri doona musqulaha ku meel gaarka ee la qaadi karo oo yaala dhinaca waqooyiga. Qolkii tababarada iyo qalabkii gargaarka degdega ah waxaa loo wareejin doonaa kiyooisyada la hareeyey.

Saddexda kubadood ee Baseball, tennis, iyo softball waxaa saameyn ku yeeshay mudadii labada sanadood ee dhismuhu socdo. Fadlan waxaad la tashataa tababaraahaga wixii warar ee ugu dambeeyey ee dhinaca tababarka ah iyo goobaha ciyaaraha lagu qabanayo.

### Xarunta Caafimaadka Ardeyda

Xaruntii Caafimaadka ee Saldhigeedu ahaa Dugsiga Sare Roosevelt iminka waxa weeyaan Adeega Unuga Caafimaadka Wareega ee Farshaxanka Gobolka kuna xiga mundulka Jimicsiga(PE) gadaalna ka xiga maktabada. Saacadaha barta caafimaadkani waa: Isniin, Arbaca, Khamiis, iyo Jimce: 7:45 a.m. to 3:45 p.m. Talaado, 9:45 a.m. ilaa 5:45 p.m. Barta caafimaadka telefoonkeegu waa (503) 988-3909.

### Kulanada Dugsiga

Sanad-dugsiyeedka 2015-16, kulanadii dugsiga waxaa lagu qaban doonaa makhaayada dugsiga. Marka uu dhammaado dhismaha qolka ciyaaruhu wuxuu qaadi doonaa inay ku kulmaan 1700 arday.

### Goobaha Laga Bixi Karo

Dhismaha socda awgii, waxaa isbedel ku dhacay iridihii iyo kuwii laga soo galayey ee dhismaha. Iridii ugu muhiimsanayd ee laga soo galayey waxay ahaaneysaa sidii hore ee ahayd, laakiin waxa suurtagal ah in kuwo hore u jiray aysan jirin doonin. Warbixintii ugu dambeysay fadlan maabkan kaasho:

[www.pps.k12.or.us/files/bond/RHS\\_Fall\\_Access\\_Plan-Web\\_15-08.pdf](http://www.pps.k12.or.us/files/bond/RHS_Fall_Access_Plan-Web_15-08.pdf)



Tiyaatarkii duuga ahaa (ka hor)



Xarunta Warbaahinta Cusub (ka dib)



Burburintii Jimka



New Gym Interior



## Raadadka Dhismuhu ku Yeelanayo Dariska:

- Jadwalka dhismuhu caadiyana wuxuu noqonayaa 7 subaxnimo. - 5 galabnimo, Isniin ilaa Jimce.
- Waxaa suurtagal in shaqo la qabto habeenada qaarkood iyo maalmaha la nasayo (Sabit/Axad).
- Waxaa kordhi doona baabuurta dhismaha ka shaqeyneysa dugsiga gudhiisa iyo agagaarkiisaba.
- Waqtigan xaadirka ah ma rajeynayno inaan dariiqyada xidhno.
- Ma fileyno in wax isbedel ah aan ku sameyno dariiqa dugsiga ku dhegan ee baabuurta la dhigto.
- Goobtii baabuurta la dhiganayey ee dugsiga lama isticmaalayo inta uu dhismuhu ka socdo dugsiga Roosevelt.
- Amniga goobta ayaa mudnaantayadu tahay. Dhismaha waxaa lagu wareejin doonaa xayndaab meelaha hawshu ka socoto dhismaha. Fadlan waxaad nagu caawisaa sidii loo joojin lahaa dadka dhibka dhismaha u geysanaya. Haddii aad aragta goobta dhismaha wax aad ka shakido, fadlan waxaad wacdaa khadka telefoonka xaaladaha aan degdeg ahayn ee Booliiska Portland 503-823-3333. Haddii aad indhahaaga ku aragto iyadoo dhibaato dhismaha loo geysanayo, waxaad wacdaa 911.
- Wixii arrimaha dhismaha la xidhiidha, fadlan waxaad la xidhiidhaa khadka telefoonka dhismaha dugsiga Roosevelt: 1-866-686- 1886

### Wax badan ka baro boggayaga

Macluumaadkii ugu dambeeyey  
mashruuca, fadlan booqo bogga dib-u-  
casriyeyna Roosevelt ee  
<http://RooseveltBond.pps.net>

Gudaha Tiyaatarka Cusub Furitaan Dayrta 2016  
Renderings Courtesy of Bassetti Architects.